

BULSHO-OGAANSHO KU BAXAYSA LUQADO KALE DUDUWAN. AMA LUQADO BADAN



UJEEDDADA TABABARKA

In ka-qaybgalayaasha lagu siiyo macluumaad aasaasi ah oo ku saabsan isdhexgalka (kotoutuminen), bulshada Finnishka iyo nolosha shaqada, iyadoo lagu dhigayo luqadda uu ka-qaybgaluhu yaqaan ama luqaddiisa.

KOOXDA LOO QOONDEEYAY

Tababarkan waxaa loogu talagalay dadka ku jira marxaladda hore ee isdhexgalka ama wadanka ku cusub.

MUDDADA

20 maalmood oo ah maalimaha shaqada (Isniin–Jimce), saacadaha 9:00–15:00.

WAXYAABAHA UU TABABARKU KA KOOBAN YAHAY

- Macluumaad aasaasi ah oo ku saabsan sida ay u shaqeyso bulshada Finnishka iyo adeegyada la heli karo.
- Macluumaad kale o isna aasaasi ah oo ku saabsan nolosha shaqada iyo suuqa shaqada
- Xuquuqda aadanaha, sinaanta iyo cadaaladda.
- Ujeedooyinka isdhexgalka, adeegyada taageera isdhexgalka iyo qaab-dhismeedka tababarka isdhexgalka.
- Is-maamulid iyo masuuliyada ku jirta waxbarashada, sida wax loo barto, iyo barashada luqad qalaad ama luqada waddanka aad ku cusubtahay.

TIRADA KOOXDA

18 arday



GOOBTA IYO HABKA FULINTA

Ardaydu waxay ka qayb qaadan karaan tababarka iyadoo jooga goobta waxbarashada ama iyadoo ku xiran qaab fogaan-arag ah.

Tababarka sidoo kale waxaa lagu qaban karaa gebi ahaanba waxbarasho onlayn ah oo la hagayo, arrintaasna mar walba waa in lagu heshiyyaa ka hor inta uusan tababarku bilaaban. Haddii waxbarasho fool-ka-fool ah la qabto, waxaa lagu qabanayaa xarumaha Careeria. Tababarka onlaynka ah waxaa lagu fulinayaa barnaamijka Teams.

Macallin ku hadla luqadda ardayga ayaa la xiriiri doona ardayda ka hor inta uusan tababarku bilaaban. Wuxuu sharxi doonaa nuxurka iyo habka tababarka. Haddii tababarku ku dhaco Teams, macallinku wuxuu hubin doonaa in ardaygu yaqaan sida loo isticmaalo barnaamijka Teams.

SHAHAADO

Ardaygu waxuu helayaa shahaado kusaabsan koorsada uu dhamaystay.

Ardaygu wuxuu heli doonaa shahaado marka uu si guul leh u dhammaysto tababarka.

WAX DHEERAAD AH WEYDII

Vantaan työllisyys- ja kotoutumispalvelut
kotokoulutukset@vantaa.fi

CareeriaPlus Oy
careeriaplus@careeria.fi



CareeriaPlus Oy
info@careeria.fi